



Länstyrelserna

Adeegyada lacag bixinta

Billaw kaar- iyo dijitaal lacag ku bixin

Guddiga gobalku - awood laysu ururiyay

Swiidan waxay u qeybsantahay 21 gobal, gobal kastana wuxuu leeyahay guddi gobal iyo guddoomiye maamul gobaleed. Guddiga gobalku wuxuu gobalka wakiil uga yahay xukuumadda, wuxuuna meel marinayaa siyaasadda qaranka, isla mar ahaantaasna wuxuu tixgelin siinayaa xaaladaha iyo duruufaha goballada la xiriira. Micnaha guddiga gobalku waa isku xire muhiim ah oo dhan ahaan u dhexeeya degmooyinka gobalka iyo muwaadiniintooda, dhan ahaanna xukuumadda, baarlamaanka iyo hey'adaha dhexe ee dowladda.

Somaliska - Materialet är framtaget av Länsstyrelsen i Örebro län
Stortorget 22, 701 86 Örebro 010-224 80 00
orebro@lansstyrelsen.se
www.lansstyrelsen.se/orebro

Cinwaan: Adeegyada lacag bixinta -billaw kaar- iyo dijitaal lacag ku
bixin Soo saare: Länsstyrelsen i Örebro län
Nambarka faafinta: 2019:5
Sawir: Susanne Lindeborg
Madbacadda: 2021, Skåne County

Waxay ka koobantahay

Kaar bangi	4
Noocyo kala duduwan oo kaarar ah	5
Maskaxda ku hay	5
Kaar lacagta ugu dhiib mashiin lacag lagu bixiyo	5
Lacag waad kala bixi kartaa, waadna ku shubi kartaa Bankomat	6
Bangiga intarneetka waxaad ka heli kartaa:	6
Waa maxay BankID?	6
Baaqyo xagga ammaanka la xiriira!	6
Faatuuro	7
Taleefan ku bixi qaansheegadka	8
Tallaabba tallaab	8
Hawlo gaar ahaaneed oo kala duduwan marka lacag la bixinayo	9
Ku dar lacag loo dire kale	9
Ku dhiib lacagta app-abka taleefanka gacanta	10
Adeegyada lacag bixinta ee dukaamada	10
Adeegyada lacag bixinta ee intarneetka	10
Lacag u xawil waddamo kale	11
Kaarar bangi hooray lacagtooda loo bixiyay	11
Ma dooneysaa in aad wax dheeraad ah ka ogaatid adeegyada bangiyada?	11
Macluumaad ma raadineysaa luqado fara badan?	11
Ma dooneysaa in aad wax dheeraad ah ka ogaatid Swiidhan?	11

Kaar bangi

Kaar bangi waxaa ku siinaya bangiga aad akoonka ka furatid. Kaar bangi waxaa sidoo kale loogu yeeraa kaar dallacaad. Si kaarka loo isticmaalo waxaa loo baahanyahay kood-nambar. Koodka oo ka kooban afar nambar waxaa ku siinaya bangiga.

Kaarka bangiga waxaad lacag ku bixin kartaa halkan Swiidhan gudeheeda iyo dibaddaba, waxaad uga adeegan kartaa dukaamanka iyo intarneetka labadaba, waxaadna kaash ugala bixi kartaa, kuna shubi kartaa Bankomat ama qaar dukaamanka ka mid ah.

Kani waa kaar bangi


Kaararka bangigu in yar ayey kala duwanaan karaan laakiin waxay mar walba ka koobanyihiin isla macluumaadkan

Bir macdan ah: Waxaa tusaale ahaan la gelinayaa mashiinka lacagta lagu dhiibo.

Taariikh: Bil iyo sanad, muujinaya ilaa inta uu kaarku shaqeynayo.

Falliiqa birlabta ah: Ayaa lagu jiidii karaa marka birta maddanta ah aan mashiinka lagu isticmaali karin.


Wejiga hore



Calaamaddu waxay muujineysaa in kaarka meel calaamadda Wi-Fi leh la saari karo si lacag loogu bixiyo.

Kaar number: Waxaa la bixinayaa marka intarneetka wax laga iibsano.

Wejiga dambe



CVV/CVC-kod: Koodka sirta ah. Waxaa la bixinayaa marka intarneetka wax laga iibsano.

Meel loogu tala galay in la saxiixo.

Noocyo kala duduwan oo kaarar ah

Kaar bangi iyo kaar dallacasho

Lacagta toos ayaa akoonka looga jaranayaa.

Kaar lacag bixin iyo kaar amaaheed

Gadaal dambe ayaa lacagta laga bixinayaa. Soo hoos gelayaa xeerarka macaamiisha.

Wax dheeraad akhriso [konsumenternas.se](https://www.konsumenternas.se)

Maskaxda ku hay

Xir kaarka lana xiriir bangigaaga haddii uu jabo kaarku, uu kaa lumo ama uu mashiin kaa liqo. Ilaasho koodkaaga, abidkaana macluumaadka shakhsiga ah ama koodadka ha iska siinnin qof.

Kaar lacagta ugu dhiib mashiin lacag lagu bixiyo

1. Kaarka geli iyadoo ay birtu hoos xigto
2. Lacagta hubi inta ay tahay
3. Koodkaaga geli
4. Batoonka cagaaran riix si aad u oggolaatid
5. Kaarkaaga qaado
6. Rasiidkaaga qaado
7. Wey dhamaatay!



Lacag waad kala bixi kartaa, waadna ku shubi kartaa Bankomat

Lacag waad kala bixi kartaa, waadna ku shubi kartaa Bankomat-yada qaarkood. Waxaa jirta fursad lagu kala dooran karo luqado fara badan. Haddii aad u baahantahid in aad koodkaaga beddelatid waxaad taas ku sameyn kara Bankomat-yada ootomaatigga ah. Fiiro gaar ah u lahay in kaarka si ootomaatik ah loo xirayo haddii aad kood qaldan gelisid seddax jeer oo isku xigxigta. Taasi wey khuseysaa mashiinnada iyo marka si kale lacag loo bixinayo intaba.

Bangiga intarneetka waxaad ka heli kartaa:

- Nambarka akoonkaaga
- Koontarool ku samey lacagaha galay iyo kuwa ka baxay akoonkaaga
- Faatuurooyinka ayaad giro-ga ku dhiibi kartaa
- Akooman kale ayaad lacag uga diri kartaa
- Adeegyo kale duwan ayaad ka maareyn kartaa, tusaale ahaan BankID iyo Swish.

Si aad u gashid bangiga intarneetka waxaad isticmaali kartaa doosaha ammaanka, BankID-ga taleefanka gacanta ama BankID kaar ah iyo mid fayl ah.



Waa maxay BankID?

BankID waa aqoonsi elekteroonig ah oo aad isticmaali kartid marka hey'ad dowladeed ama bangi aad intarneetka isugu sheegeysid qofka aad tihid. Waqtiga hadda ah waa aqoonsiga elekteroonigga ah ee Swiidhan ugu badan ee la barbar dhigi karo aqoonsiyada kale sida baasaboortu iyo leysin gaari.

Baaqyo xagga ammaanka la xiriira!

Abidkaa taleefan ama e-mail ha ku dhiibin macluumaadka shakhsiga ah. Si suga uga bax, ka dib marka aad gashid bangigaaga intarneetka ama bog kale oo intarneet.



Faatuuro

Faatuuro waxay u ekaan kartaa siyaabo kala duduwan.
Waa kanaa hal tusaale.



Magaca shirkadda



Nambarka faatuurada 15350
Nambarrada OCR-ta 11100067349401
Taariikhda faatuurada 2019-01-01
Nambarka macaamiisha 341134111

Magaca hore Magaca dambe
Cinwaanka waddada
Nambarka boostada Xaafadda

Halkan ayey ku qorantahay sida aad faatuuro ku bixin kartid.
Si aad faatuuro si dijitaal ah ugu bixisid waxaad mar walba u baahantahay in aad qortid giro-ga ama koontonambarka iyo nambarka aqoonsiga tixraaca ama OCR-ka.

Lacagta aan noo 1 200 oo koron
soo shubeysid 1 Febraayo 2018

Haddii aad adeegsanaysid si kale oo lacag loo bixiyo oo aan ahayn rasiidka lacagta lagu bixiyo waa muhiim in aad qortid OCR-kaaga

Magaca shirkadda AB Taleefan 020-222 222 Nambarrada aqoonsiga ee shirkadda 1000100011
116 00 Stockholm Plusgiro 94 90 01-1 Nambarrada canshuurta dadban 3334445
Företaget.se Bankgiro 5572-4949 Oggolaashada F-skatt-ka

Bankgiro-ga

WARQADDA WARGELINTA LACAG BIXINTA

Warqaddan wargelinta waxaad lacag kula bixin kartaa dhammaan akoonnada bangiga adigoo adeegsanaya

Bangiga ayaa buuxinaya **OCR**

Bankgiro Akoon qof ahaaneed
Privatgiro Akoonka caadiga ah
Akoonka keydka

Nambarka faatuurada 65305350
Nambarrada macaamiisha 341134111
Taariikhda ay faatuuradu dhaceysa 2019-02-01

Isticmaalaha lacag bixinta

Magaca hore Magaca dambe
Cinwaanka waddada
Nambarka boostada Xaafadda boostada

Nambarka bankgiro- Cidda lacagta loo dirayo
ga ay lacagtu ku socoto.
5572-4949 Magaca shirkadda AB

FADLAN WAX ISBEDDELLO AH HA KU SAMEYN FARRIIN WARQADDA OGEYSIINTA LAGUMA GUDBIN KARO MASHIIN AYAA AKHRINAYA

OCR/TIXRAAC

11100067349401 #

1 200

Koron

Öre

5572959#41#

Taleefan ku bixi qaansheegadka

App-abka taleefannada gacanta ee bangiyada kala duduwan wey kala duwanaan karaan laakin si lacag qaansheegad u bixisid waxaad mar walba u baahantahay isla macluumaadka. Halkan waxaa xiga tusaale ku aaddan sida uu u ekaan karo marka aad faatuuro bankgiro ah taleefan gacan ku bixineysid.

Ka billaw in aad gashid bangigaaga. Si aad BankID-ga taleefanka gacanta ugu gashid waxaad u baahantahay in aad ku qortid nambarradaada aqoonsiga iyo koodka sirta ah (6 nambar).


Markaas ka dib waxaa xigaya tallaabahan:

Tallaabba tallaab

- Liiska shaashadda tag
- Riix Betala och överföra
- Dooro akoonka lacagta laga jarayo
- Dooro ama ku dar cidda ay lacagtu ku socoto
- Lacagta ku qor
- Taariikhda ku buuxi
- OCR-ka ku qor. Haddii nambar OCR uusan jirin –nambarka faatuurada farriin ahaan ugu qor
- Riix Läggtill
- Riix Godkänn ee sug inta uu BankID-gu ka furmayo
- Koodkaaga geli, (6 nambar)
- Riix Legitimera
- Aad Klar si aad arrimaha kale usii wadatid ama Logga ut.

Calaamadda liiska magacyada

Daaqad ayaa furmeysa ama soo dhaceysa marka aad doorashadaada sameysid.



Hawlo gaar ahaaneed oo kala duduwan marka lacag la bixinayo

Faatuurooyinka dijitaal ahaan kuugu yimaada waxaad u baahantahay in aad saxiixdid oo keliya, aadna oggolaatid.

Haddii faatuuradu kood QR leedahay waad ku akhrin kartaa macluumaadka faatuurada. Riix calaamadda kaamirada ee sawir koodka ka qaad. Xitaa sadarka ugu hooseeya faatuurada waa lagu akhrin karaa kaamirada.



Calaamad kalandaariye. Riix si aad taariikh u soo qaadatid.

Betala och överföra

1 e-fakturor

Ny betalning/överföring

Från
Ditt bankkonto

Till
Företagsnamn

Belopp
260 kr

Snarast

OCR
11100067349401

Lägg till

Lägg till ny mottagare

1. Typ av mottagare

Lägg till ny mottagare

Bankgiro
Plusgiro
Bankkonto
Personkonto

Lägg till ny mottagare

Bankgiro

2. 5572-4949

3. Hämta mottagarnamn

Mottagarensnamn
Företagsnamn AB

4.

5. Godkänn mottagaren

Ku dhiib bangi horbaba kuu qoran- ama plusgiro, lacag u xawil akoonkaaga ama akoonno kale.

Välj mottagare

sök

Ny mottagare

Bg/Pg

Mina Konton

Övriga Konton

Ku dar lacag loo dire kale

1. Dooro nooca loo diraha
2. Ku qor nambarka bankgiro-ga aad ka heshid faatuurada
3. Riix Hämta mottagarnamn
4. Hubi in uu magacu sax yahay
5. Oggolaw loo diraha.

Ku dhiib lacagta app-abka taleefanka gacanta

Lacagaha waad ku bixin kartaa app-abka taleefanka gacanta. Waxaa jira waxyaabo badan oo la kala dooran karo sida tusaale ahaan Swish, Seqr, Samsung Pay iyo Apple Pay. Swish oo ay leeyihiin 7 bangi waa app-ka taleefanka gacanta ee loogu adeegsiga badanyahay. App-abka waxaad lacag ugu kala xawili kartaa dad shacab ah iyo shirkado. Lacagta toos ayaa akoonka looga jaranayaa. Wax ay fiicantahay in la ogaado waa in bangi kasta uu isagu lacagihiisa khidmada go'aaminaya. Lacag wey kuu soo dhici kartaa adigoo haysan taleefan gacan oo caqli badan.

Adeegyada lacag bixinta ee dukaamada

Dukaamada qaarkood waxaad, adigoo lacag ka dhiibaya, miiska dushiisa ku bixin kartaa qaansheegadyada, la bixi kartaa, ku shubi kartaa, kuna xawili kartaa lacag.

Adeegyada lacag bixinta ee intarneetka

Waxaa jira siyaabo kala duduwan oo intarneet lacag loogu bixin karo marka laga reebo in bangi la adeedgsado. PayPal, Masterpass iyo Klarna waa dhawr tusaale oo adeegyada lacag bixinta ka mid ah.



Lacag u xawil waddamo kale

Konsumentverket wuxuu hayaa adeegga, Money from Sweden, halkaas oo aad isku barbar dhigi kartid inta kharash ah ee ay ku kaceyso in shirkado kala duwan lacag la diro. Waxaad sidoo kale arkaysaa inta waqti ah ee ay qaadaneyso. Konsumentverket waa hey'ad dowladeed.



Kaarar bangi hooray lacagtooda loo bixiyay -wax ay dooran karaan dalxiisayaasha iyo magangelyodoonku

Kaarar bangi oo hooray lacagtiisa loo bixiyay waxaa la isticmaali karaa si looga adeegto dukaaman oggol kaar lacag ku bixinta iyo intarneetka. Waxaa wax looga iibsan karaa dukaamanka maalinlaha ah ama doqoshyada. Lacagaha khidmada ah iyo xeerarka wey ku kala duwanyihiin kaararka suuqa yaalla.

**Ma dooneysaa in aad wax dheeraad ah
ka ogaatid adeegyada bangiyada?**

Gal konsumenternas.se/ny-i-sverige

**Macluumaad ma raadineysaa
luqado fara badan?**

Booqo [hallakonsument.se/pengar-och-ekonomi/
livssituationer/ny-i-sverige/](https://hallakonsument.se/pengar-och-ekonomi/livssituationer/ny-i-sverige/)

**Ma dooneysaa in aad wax dheeraad
ah ka ogaatid Swiidhan?**

Booqo informationsverige.se



Länsstyrelserna

Länsstyrelsen Skåne

Catharina Hellström Engström, 010-224 13 72
catharina.hellstrom.engstrom@lansstyrelsen.se

Lisbet Smolka Ringborg, 010-224 16 36
lisbet.smolka-ringborg@lansstyrelsen.se
www.lansstyrelsen.se/skane/betaltjanster